

## Tallaalka hargabka infuluwensada

### Warbixin ku socota dumarka uurka leh

Haddaad tahay qof uur leh waxaad khatar ugu sugan tahay inaad aad ula xanuunsato infuluwensada. Sidaas awgeed waa inaad iska tallaasho hargabka infuluwensada marka aad dhaafsto toddobaadka 16 ee xaamilnimada. Tallaalkaasina ma ahan mid waxyeello u geysanaya uurka ama ilmaha caloosha ku jira.

### Dumarka uurka leh ayaa halis dheeraad ah ugu sugan infuluwensada.

Dumarka uurka leh intooda badan waxaa ku dhaca cudurka infuluwensada laakiin aad u lama xanuunsadaan, in kasta oo ay dadka kale uga khatar badan yihii in ay aad ula xanuunsadaan ama u dhintaan.

### Dumarka uurka lihi waa inay istallaalaan

Hay'adda caafimaadka dadweynuhu waxay dumarka uurka leh kula talineysaa in ay iska tallaalaan infuluwensada inta u dhexeysa noofember ilaa jannaayo. Wuxaan lagu la talinayaan inay istallaalaan wixii ka dambeeyaa toddobaadka 16 ee uurka maadaama ay halista cudurka infuluwensadu ugu weyn tahay uurka qaybihiisa dambe.

Haddii ay jiraan sababo kale oo sii xoojinaya khatarta cudurka infuluwensada, waxaan kugu la talineynnaa inaad istallaasho goor ka sii horreysa waqtigaas. Sababahaas kale oo khatarta keeni kara waxaa ka mid noqon kara cuduro wadnaha ama sambabada oo halis ah ama cudurka sonkorta ama cayil xad-dhaaf ah. Tallaalkaasi waa mid la qaadan karo inta lagu jiro xilliga uurka.

### Tallaalkaasina wax saamayn ah kuma yeelanayo ilmaha.

Tallaalku ma saameynayo ilmaha uurjiifta ah. Cilmi-baarisyo badan waxaa lagu muujiyey inaan wax farqi ahi u dhexeyn ilmaha ku jira uurka hooyada la tallaalay iyo mappaan la tallalin.

### Tallaalkaasi wuxuu kaloo difaac siinayaan ilmaha dhashay.

Tallaalka lagu siiyey wuxuu kaloo ilmaha ka difaacayaa infuluwensada bilaha ugu horreeya noloshiisa. Taasi waxay ku xiran tahay sida aad maaddooyinka difaaca jirka ugu gudbiso ilmaha inta uu uurka ku jiro. Taas ka sokow waxaa yaraanaya khatarta inaad la xanuunsato infuluwensada oo ilmaha u sii gudbiso.

### Cilladaha ka imaan karaana waa kuwo yar

Tallaalka infuluwensadu wuxuu keeni karaa cillado, laakiin faa'iidada ayaa ka weyn khataraha ka iman kara. Cilladaha caadi ahaan laga helo waa kuwo khafiif ah oo dhaqso u baaba'a (eeg sadarka soo socda).

Tallaalku isagu ma keeno infuluwenso. Mana jiro xiriir ka dhexeeya tallaalka infuluwensada xilliga iyo cudurka hurdada iyo daalka badan (narkolepsi).

CILLADAH AAN CAADIGA AH (ugu yaraan boqolkii la tallaalaba mid): Meeshii cirbadda looga muday oo casaata, bararta oo xanfafta, xummad, madax-xanuun, dhidid badan, ama murqaha ama kalagoosyada oo xanuuna.

CILLADAH AAN CAADIGA AHAYN AMA DHIF U DHACA: Xasaasiyad, cuncun, finan ama xididdada oo xanuuna.

### Dadka oo dhani tallaal uma baahna.

Daawada tallaalka waxaa ku jiri kara barotiin ukumeed maadaama la isticmaalo fiiruska infuluwensada oo ukun lagu dhex beeray. Haddaad aad xasaasi ugu noqoto ukunta, la xiriir dhakhtar.

Sidoo kale u sheeg haddaad og tahay in daawada tallaalka uu ku jiro wax aad xasaasi ku tahay ama jirkaagu horay u qoonsaday.

**Tallaalkaasi waa mid xilli ku eg**

Tallaalka infuluwensadu wuxuu waxtar leeyahay 6 ilaa 9 bilood oo noqoneysa inta infuluwensada xilligu jirto. Tallaalku wuxuu ka hortagaa saddex nooc oo infuluwenso ah. Saddexdaas noocna marmar waa isbeddelaan oo fiirus cusub ayaa marmar iman kara. Sidaas awgeed ayaa tallaalka la beddelaa xilli walba.

**Dumarka uurka lihi waa inay doontaan daryeelka caafimaad**

Waxaa muhiim ah in la ogaado in dumarka uurka lihi ay si khatar ula jirran karaan infuluwensada, gaar ahaan inta ay ku jiraan toddobaadyada ugu dambeeya uurka. Haddaad ka shakido inaad qaadday infuluwensa waa inaad toos ula xiriirtaa rugta daryeelka caafimaadka, xataa haddii aadan aad u xanuunsanayn uurku toddobaadkuu doono ha noqdee. Tusaale ahaan waxaad u baahnaan kartaa daawo fiiruska ka hortagta oo waxtarkeedu ugu fiican yahay marka dhaqso loo isticmaalo.

**Halkaan ayaad wax dheeraad ah ka sii akhrisan kartaa**

Maclumaad ku saabsan tallaalka infuluwensada oo laga helayo 1177 Vårdguiden:  
Maclumaad ku saabsan infuluwensada iyo xaamilnimada oo laga helayo barta Infpreg:

Maclumaad ku saabsan cillada daawada tallaalka oo laga helayo barta internet ee Wakaaladda Daawooyinka: